# Cillad-bixinta Arrimaha Tegnoolajiyadda ee loogu talagalay Ardayda Imtixaanka ku Qaaadanaysa Guriga

**1. Maxaan sameyn karaa si aan u caawiyo ilmahayga haddii ay imtixaan ku qaadanayaan guriga?**

☐ Ilmahaagu wax ha iskula dubarido macallinka si uu u qaato ku tababarashada imtixaanka. Haddii ilmahaagu uu qaadan karo ku tababarashada imtixaanka oo fiidiyow la’aan, taasi waxay tusaysaa in uu haysto quwada ‘bandwidth’ ku filan si uu u qaato imtixaanka dhabta ah fiidiyow la’aan.

☐ Samee tijaabada xawaaraha internet-ka ka hor maalinta imtixaanka. U isticmaal hubinta Ogaanshaha Bandwidth-ka ee ku yaal website-ka Check My Speed si loo go’aamiyo in uu xawaaraha internet-kaagu yahay mid degdeg badan oo lagu qaadan karo imtixaanka guriga.

☐ Ka hubi ku xirnaanta nidaamka website-ka Check My Speed. Hubinta ku xirnaanta nidaamka ayaa kuu sheegi doonta in aad ku xirmi karto nidaamka imtixaan qaadista.

☐ Xaqiiji in uu ilmahaaga u rakiban yahay Browser Sugan kambiyuutarkiisa, laptop-ka, ama aaladda iPad-ka. Browser-ka Sugan ayaa u oggolaanayaa in uu ilmahaagu helo imtixaanka oo kaliya oo wuxuuna ku siin doonaa jawi imtixaan qaadasho oo sugan. Waxaad heli kartaa in aad soo dejisato Browser-ka Sugan ee ku yaala nidaamka OSAS. Haddii aadan arkin astaanta Browser-ka Sugan (oo ka muuqda dhanka midigta), la xiriir macallinka ilmahaaga ama dugsiga si aad u ogaato in aad u baahan tahay in aad rakibto Browser-ka Sugan. Tilmaamaha rakibaada Browser-ka Sugan ayaa laga heli karaa nidaamka ISAT. Haddii ay kaa geyn weydo, waxa kale oo aad rakiban kartaa meesha laga gelo web-ka caadiga ah sida Google Chrome ama Mozilla Firefox.

☐ Hubi aaladda qaadashada imtixaanka ee ilmahaaga ee ku dhex-samaysan ama la geliyo webcam-ka, makarafoonka, ama sameecadaha/maqalka. Xaqiiji in uu ilmahaagu ku dhaqaajiyo hubinta Maqalka/Fiidiyowga website-ka Hubinta Ogaanshaha korkiisa si loo hubiyo in qalabkiisa maqalka iyo muuqaalkuba si sax ah u shaqeynayaan.

☐ Haddii ilmahaagu u baahan yahay tiknoolajiyada la adeegsado, sida software-ka qoraalka u beddela hadalka ama shaashad akhriye, xaqiiji in uu ku rakiban yahay aaladda imtixaanka. Ogow: Nidaamkani software-ku waxa uu la shaqeeyaa Windows iyo Mac OS oo kaliya.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u diyaarinta ilmahaaga in uu ku qaato imtixaan guriga, ka fiiri buug-yaraha xiriiriyeyaasha soo socda:

- Hagaha Waalidka ODE: Sida Loo Hubiyo Xawaaraha Internet-kaaga
- Macmuulaadka dhanka muuqaalka ah ee Waalidka ODE: Liiska Hubinta Imtixaan Qaadista Meesha Fog La joogo ee Waalidka/Mas'uulka
- Hagaha Waalidka ODE: Hagaha Dhakhsaha Leh ee loogu talagalay Qoysaska iyo Ardayda ku qaadanaysa Imtixaanka Iyaga oo meel fog jooga


2. **Halkee ayaan ka helaa username-ka (Magaca Hore), Lambarka Aqoonsiga Ardayga (SSID), iyo Aqoonsiga Kulanka ilmahaygu ugu baahan yahay si uu u galo 'log in' si uu isaga oo meel fog jooga ugu qaato imtixaanka guriga?**

- Macallinka ilmahaaga ayaa haya dhammaan macluumaadka ilmahaagu ugu baahan yahay si uu u galo 'log in' imtixaanka. Macallinku waa in uu ku gubiyaa Aqoonsiga ardayga hab sugan ma aha in uu soo mariyo farriimaha telefoonka ama email.
- Ardayda waxa looga baahan yahay inay galiyaan macluumaadka soo socda:
  - Magacooda koowaad sida saxda ah ee uu uga muuqdo foomka diiwaangelinta dugsiga. Waa muhiim in uu ardaygu isticmaalo magaciisa koowaad ee rasmiga ah marka uu galayo 'logging in' imtixaanka oo ma aha naanays.
  - Lambarkiisa aqoonsiga SSID sida uu ugu qoondeeyay dugsigiisu, degmadiisu, ama gobolkiisu.
  - Aqoonsiga Kulanka ee loogu talagalay kulanka imtixaanka meesha fog la joogo ee uu ku soo biiri doono. Kan waxa bixin doona macallinka ka hor ama maalinta imtixaanka (tusaale ahaan, OR-F12A-9).


3. **Waxaan gelinayaa macluumaadkayga, laakiin ma gali karo 'log in' imtixaanka. Maxaan sameeyaa?**

- Sababta ugu badan ee ardaydu aanay u geli karin 'log in' nidaamka ayaa ah iyaga oo jooga bar internet oo qaldan. <u>Fadlan hubi xaaladaha soo socda ee dhici kara si aad u hubiso in ilmahaagu joogo barta internet-ka ee saxda ah:</u>

➢ Haddii lmahaagu u isticmaalayo Browser-ka Sugan si uu ku qaato imtixaanka guriga, markaa ka dib Browser-ka Sugan ayaa muujin doona Shaashada la gelayo si loo helo imtixaanka isla marka uu furmo ka dib.



- Haddii ilmahaagu qaadanayo ku tababarashada imtixaanka, oo ka duwan imtixaanka dhabta ah, markaa ka dib ilmahaagu wuxuu arki doonaa nooc ka duwan oo ah shaashada la gelayo oo ku weydiinaysa haddii ay jeceshahay in aad ku soo gasho 'log in' marti ahaan.




**Ogow**: *Haddii ilmahaagu u qaadanayo imtixaan dhab ah oo uu macallinku u xilsaaray, waa in shaashada la gelayaa AANAY bixin doorashada ugu galista marti ahaan. Haddii aad aragto fursada ugu galista 'login' marti ahaan, fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga si aad u xaqiijiso in aad ku joogto tahay goobta saxda ah ee loogu talagalay imtixaanka uu qaadanayo.*

**4. Ilmahaygu ma arkayo fiidiyowgiisa, ama waxaa u soo baxaysa astaan tilmaamaysa murugo 'sad cloud icon' marka uu imtixaanka qaadanayo. Sidee baan ku xaqiijiyaa in wax kasta in si sax ah loo dejiyay?**

- Marka hore, xaqiiji in aaladda u ilmahaagu isticmaalayo uu leeyahay webcam. iPad kastaa wuxuu leeyahay webcam. Inta badan laptop-yada casriga ahi waxa ay ku yimaadaan webcam-yada lagu dhisay oo ay indhaha qaawani ay arki karaan, tusaale ahaan, muraayad yar 'lens' oo shaashada bartamaheeda sare ku taala. Haddii u ilmahaagu isticmaalayo laptop ama kambiyuutarka desktop-ka oo aan muraayad 'lens' ku lahayn korka shaashada, webcam ayaa lagu xidhi karaa kambiyuutarka.

- Marka xigta, si aad u hubiso in uu webcam-ku si sax u shaqeynayo, fadlan booqo website-ka Hubinta Ogaanshaha oo isticmaal hubinta webcam-ka.

- Marka xigta, isla barta website-ka ee korka ku qoran, waxa aad dhaqaajin kartaa hubinta ku xirnaanta meesha fog la joogo. Hubintani tooska ah ayaa xaqiijin doona in aaladdaada iyo qaababka nidaamka si ku habboon loo dejiyay ee loogu talagalay in qaababkani shaqeeyaan imtixaanka gudahiisa. Haddii uu jiro qalad lagaga soo warbixiyay oo ku saabsan hubintani, fadlan u dir macallinka ilmahaaga si ay taageero uga helaan shaqaalaha nidaamka IT ee degmada ama dugsiga.

- Haddii lmahaagu uu isticmaalayo kambiyuutar uu dugsigu bixiyo, dejinta lagu habeeyey dugsiga ayaa laga yaabaa in ay u baahan tahay in la beddelo. Degmadaada ama shaqaalaha IT-ga dugsigaaga ayaa kaa caawin kara tani.

5. **Sidee baan ku hubin karaa in khadka ku xiraanta internet-ka ee gurigaygu uu yahay mid degdeg badan yahay in imtixaan lagu qaato?**

Buug-yaraha soo socda ayaa sharraxaya sida loo isticmaalo aaladda ogaanshaha quwada bandwidth-ka si loo hubiyo in in uu xawaaraha internet-kaaga ee gurigu degdeg badan yahay: Hagaha Waalidka ODE: Sida Loo Hubiyo Xawaaraha Internet-kaaga

- Booqo website-ka Hubinta Ogaanshaha ee ku jirta aallada qalabka iyo nidaamka guriga aad u isticmaali doonto imtixaan. Isticmaal hubinta ogaanshaha bandwidth-ka.
- Hubinta ogaanshaha bandwidth-ka ayaa cabbiri doonta bandwidth-ka la heli karo oo taasina hubin doonta iyada oo isku fiirinaysa shuruudaha imtixaanka.
- Hadddi ay jirto bandwidth ku filan oo la heli karo, sanduuq qoran oo **cagaar ah** ayaa soo bixi doona oo wadata farriin sheegaysa in aad leedahay bandwidth kugu filan oo aad imtixaanka kaga qaadato adiga oo guriga jooga.
- Haddii aysan sidaas ahayn, waxa soo bixi doona sanduuq qoran oo **casaan ah** oo wata farriin sheegaysa in aadan haysan bandwidth kugu filan oo aad imtixaanka kaga qaadato adiga oo guriga jooga. Haddii xawaarahaagu uusan ahayn mid degdeg badan, isku day in aad mar labaad sameyso hubin marka ay dad intii hore ka yar guriga ku isticmaalayaan Internet-ka.

6. **Ilmahayga miyaa wax laga duubi doonaa inta lagu jiro imtixaanka?**

- Waaxda Waxbarashada ee Oregon kama duubi doonto wax fiidiyow ah, sawirro, ama maqal ah inta lagu jiro imtixaanka, sidoo kalena wax qoraalka wada sheekaysiga ah 'chat' lama keydin doono. Waxa kaliya ee ka reeban dhaqankani ayaa ah qaybta hadalka ee loogu talagalay qiimeynta Aqoonta luqadda Ingiriisiga, halkaas oo jawaabaha ardayda ku hadasho ay tahay in la keydiyo si ay u dhibco ugu siiyaan dadka qiimeynayaa.
- Nidaamka imtixaan qaadista ee internet-ka ee u oggolaanaya ardaydu in ay imtixaanada ku qaataan guriga ayaa lagu dhisay mabda'a asturnaanta muhiima la siinayo. Nidaamku wuxuu si toos ah kambiyuutarka macallinka ugu xiraa ka ardayga, iyada oo dhammaan fiidiyowga, maqalka, iyo qoraalka ay dhaxeeyaan labadaas shaqsi.

7. **Ilmahayga waxa kolba dib loogu soo soo celinayaa shaashada la gelayo marka uu imtixaanka ku qaadanayo guriga. Maxay sidani u dhici kartaa?**

- Sababta ugu badan ee ardayda dib loogu celiyo shaashada la gelayo ayaa ah iyaga oo gujiya badhanka **Pause** marka lagu jiro imtixaanka. Badhanka **Pause** ayaa inta badan loo isticmaalaa in loogu oggolaado ardaydu in ay u qaataan biririf musqusha ama hakad kale oo ujeedo leh inta lagu jiro imtixaanka. Fiiri labada goobood ee suurtagalka ah ee badhanka **Pause** ee ku jira sawirrada hoose.



- Ardaygu wuxuu sidoo kale ka bixi karaa 'logged out' imtixaanka haddii uu imtixaankiisa ku qaadanayo Browser-ka Sugan oo isku dayo in uu galo barnaamij kale ama isku waqti internet-ka ka galo kambiyuutarka.
- Si uu dib ugu soo noqdo imtixaanka, ardaygu waa in uu dib soo geliya macluumaadkiisa lagu gelo 'login' ee lagu sifeeyay Su'aasha #2 iyada qaadaha imtixaankuna ay tahay in uu dib u ugu oggolaado in uu galo kulanka imtixaanka.
- Ka hor inta aan loo dib loogu tilmaamin shaashada la gelayo, ardayga ayaa had iyo jeer la tusaa farriin sheegaysa sababta ay tani u dhacayso. Sababta uu ardaygu uga baxay imtixaanka waxay sidoo kale ka soo muuqan doontaa shaashada macallinkiisa, si aad markaa adigu macallinka ugala xiriiri karto macluumaadkan.

### 8. Maxaan sameeyaa haddii uu ilmahaygu la kulmo dhibaatooyin dhanka internet-ka ah marka uu imtixaanka guriga ku qaadanayo?

- Haddii hubinta xawaaraha internet-ka lagu sifeeyay Su'aasha #5 ay muujinayso in uusan xawaaraha internet-kaaga ee gurigu degdeg badan lahayn si loogu qaato imtixaan guriga, waxaad isku dayi kartaa waxyaabaha soo socda:
  - Xaqiiji in ilmahaagu yahay qofka kaliya ee guriga ku jira ee isticmaalaya internet-ka inta imtixaanku socdo si xawaaraha internet-kaagu uu uu diiradda saari karo imtixaanka. Haddii qof kale oo jooga uu gurigu u soo fiirsanayo filin ama bandhig TV ama u internet-ka u isticmaalayo dugsiga, waxaa ka yaraan doona bandwidth-ka ilmahaagu uu ku qaadanayo imtixaanka.
  - Kambiyuutarkaaga ama iPad-kaaga u soo dhowee modem-kaaha ama router-kaaga.
  - Si toos ah kambiyuutarkaaga ugu xir modem-kaaga ama router-kaaga.
  - Ka saar aaladaha kale ee ku xiran nidaamkaaga inta ilmahaagu uu imtixaanka qaadanayo.
- Fadlan ogow in inkasta oo ardaydu ay dhibaato kala kulmi karaan khadka ku xirnaanta internet-ka gurigooda, nidaamka gudbinta imtixaanka ayaa si joogto ah u keydiya shaqada ardayda markaa haddaba jawaabaha ilmahaaga si toos ah ayuu u qaban doonaa nidaamku.
- Haddii nidaamka imtixaanku aanu keydin/badbaadin karin jawaabaha ardayda, waxay si toos ah uga hor istaagi doontaa ilmahaaga in uu imtixaanka sii wato.
- Si uu u dhammeystiro oo uu gudbiyo imtixaankiisa, ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa khadka ku xirnaanta internet oo firfircoon si uu u dhammeystiro imtixaanka. Haddii u ilmahaagu kari waayo in uu imtixaanka ku dhammeystiro guriga, fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga.

### 9. Maxaan sameyn karaa si aan u caawiyo ilmahayga haddii uu dib ugu soo noqonayo shaashada la gelayo?

- Haddii ilmahaaga laga bixiyo 'logged out' imtixaanka uu ku qaadanayo guriga, waxa ugu fiican ee ah in la sameeyo ayaa ah in aad ka caawiso ilmahaaga in uu dib ugu soo laabto 'logged back' imtixaanka sida ugu dhakhsaha badan. Isticmaal macluumaadka ku jira Su'aasha #2 si aad uga caawiso in uu dib ugu soo laabto 'log back' imtixaanka.
- Ka dib marka uu ilmahaagu dib ugu soo laabto 'log back' imtixaanka, maamulaha

imtixaanku wuxuu si cad u arki doonaa isaga oo isku dayaya in uu halkii ka sii wato imtixaankiisa, haddii ay khuseyso, kuwada hadalka fiidiyowga ayaa si toos ah dib u hawlgeli doona.

- Haddii ay suurtagal tahay, waxa kale oo aad u baahan kartaa in aad email u dirto macallinka ilmahaaga adiga oo u sharraxaya waxa dhacay sababta oo ah xaaladaha qaarkood macallinka ayaa u baahan doona in uu qoro warbixin sharraxaysa nooc kasta oo dhaqan aan caadi ahayn in ay jireen intii lagu jiray fadhiga imtixaanka.

**10. Kaamarada ayaa is daaraysa oo hadana is deminaysa inta lagu jiro imtixaanka. Waa maxay sababtu?**

- Haddii ay tani dhacayso, barnaamij kale oo kambiyuutarka ilmahaaga ku jira ayaa laga yaabaa in uu isku dayayo in uu marin gelo kaamarada isla wakhtiga ilmahaagu imtixaan ku qaadanayo guriga.
- Hubi in aad xaqiijiso in barnaamij kale oo kasta oo ilmahaagu u isticmaalayo waxbarashada la kala durugsan yahay ama la kala joogo meel fog ay xiran yihiin si kaamarada loogu isticmaalo kaliya nidaamka imtixaanka. Barnaamijyada ka socda kambiyuutarka ilmahaaga waa in ay ka soo muuqdaan astaanta la riixayo 'toolbar' ee ka tirsan kambiyuutarka ee dhanka hoose ee shaashada ku yaal. Haddii ay jiraan barnaamijyo loo isticmaalo waxbarashada la kala durugsan yahay ama la kala joogo meel fog, fadlan xir ka hor inta aanu ilmahaagu isku dayin in uu imtixaan ku qaado guriga.
- Nidaamka imtixaan qaadista ee internet-ka ayaa had iyo jeer u baahan gelitaan aan lala wadaagin kaamarada.
- Haddii ilmahaagu u isticmaalayo kaamarad dibada ah, xaqiiji in ay si buuxda ugu xiran tahay kambiyuutarka.

**11. Shaashadaydu halkeeda ayay taagan tahay marka aan imtixaanka ku jiro. Maxaan sameeyaa?**

- Haddii ilmahaagu uu la kulmo gaabis ama istaaga imtixaan inta uu ku qaadanayo imtixaanka guriga, waxa laga yaabaa in ay muujinayso in ay jiraan dhibaatooyin ah khadka ku xirnaanta internet-ka ee gurigaaga. Waxa laga yaabaa in dadka kale ee guriga ku jira ay isticmaalayaan internet-ka ama ilmahaagu uu fadhiyo meel aad uga fog router-kiina.
- Isku day tallaabooyinka lagu taliyay ee ku jira Su'aasha #8 si aad u xalliso cillada.
- Haddii uu ilmahaagu sii wado in uu la kulmo tani ama dhibaatooyinka kale oo farsamo inta uu ku qaadanayo imtixaanka guriga, waa in aad la xiriirtaa macallinka ilmahaaga.

  *Ogow haddii ilmahaagu si guul leh u dhammeystiri karo ku tababarashada imtixaanka iyada oo aan shaashadiisu aysan meesheeda iska taagnayn, waa in uu sidoo kalena qaadan karaan imtixaanka meesha fog la joogo.*

**12. Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loogu diyaariyo kambiyuutarka ilmahayaga ama iPad-kiisa si uu imtixaan uga qaadan kar guriga?**

- Fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga ama si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fadlan booqo website-ka Imtixaan Qaadista ee ODE.